



## Hadii qofkiin calooshiisa shay ka dareemo, oo uu ka shakiyo in wax ka yimaadeen iyo in kale, yaanu ka bixin masjidka ilaa uu maqlo cod ama uu ur dareemo

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: wuxuu yiri Rasuulka Ilaahay scw-: "Hadii qofkiin calooshiisa shay ka dareemo, oo uu ka shakiyo in wax ka yimaadeen iyo in kale, yaanu ka bixin masjidka ilaa uu maqlo cod ama uu ur dareemo.

[Xadiis Saxiix ah.] [Waxa wariyay Muslim.]

Nabigu scw wuxuu cadeeyey hadii qofka tukanaaya calooshiisa ka dareemo dhaqdhaqaaq oo uu kala garan waayo in wax ka yimaadeen iyo in kale, ayaanu salaada ka bixin oo jarin si uu u soo wayso qaato, ilaa uu hubsado inuu jiro shay waysadiisii ka buriyey, taaso ah inuu maqlo neef codkeed ama uu uriyo neef, maxaa yeelay qofka huba waysada shaki kama buriyo, qofkuna wuu hubaa waysadiisii, shayga dhaqaajiyey ayaa shaki ah.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65083>

